# Macaashka dhaxalka

## Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Muhimadda Ceymiska Lambarka Bulshada dadka leh dhaxalka | 1 |
| Haddii aad shaqeyneyso ... waxyaabaha aad dooneyso in aad ka ogaato macaashka dadka leh dhaxalka | 1 |
| Marka qof qaraabo ah geeriyoodo ... waxyaabaha aad dooneyso in aad ka ogaato macaashka dadka leh dhaxalka | 4 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 6 |


## Muhimadda Ceymiska Lambarka Bulshada dadka leh dhaxalka

Qofka qoyska u shaqeeya oo geeriyooda waa arrin dhibaato blaaran keeni karta, dhaqaale iyo caadifad ahaan. Lambarka Bulshada waxa ay caawisaa qoyska qofkii u sahqeynayey ka geeriyooday.

Buuggan waxa uu fikrad guud idinka siinayaa macaashka dadka leh dhaxalka ee xaaska/seyga iyo caruurta qofkii u shaqeynayey geeriyooday. Buuggan looguma talo gelin inuu ka jawaaboi dhamaan su'aalaha aad qabi kartaan. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsn barnaamijyada dadka dhaxalka leh, soo booqo barta internetka ama naga soo wac lambarka lacag la'aanta ah.

## Haddii aad shaqeyneyso ... waxyaabaha aad dooneyso in aad ka ogaato macaashka dadka leh dhaxalka

### "Ceymiska nolosha" ee Lambarka Bulshada

Dadka badankiis waxa ay u heystaan in Lambarka Bulshada yahay barnaamij hawlgab. Laakiin qaar ka mid ah canshuurta Lambarka Bulshada ee aad bixisaan waa ceymiska dadka leh dhaxalka iyo qoysaska laga geeriyoodo. Dhab ahaantii, qiimaha ceymiska dadka leh dhaxalka ee Lambarka Bulshada waa mid ka qiime badan ceymiska aad adigu naftaada geliso.

Marka aad geeriyooto, waxaa laga yaabaa in dadka aad ka tagto qaarkood ay xaq u yeeshaan macaash. Waxaa ka mid ah haweenta sayga/xaaska aad ka dhimato (sayga/xaaska is furay), caruurtaada iyo waalidka kula nool.

## Sidee ayaan ku heli karaa ceymiska dhaxalka?

Marka aad shaqeyso oo bixiso canshuurta Lambarka Bulshada, waxa aad heleysaa "dhibcaha" Lambarka Bulshada. Sanadaha lagaa doonayo in aad shaqxeyso si qoyskaagu xaq ugu yeesho macaashka dhaxalka ee Lambarka Bulshadawaxa ay ku xiran tahay inta ay tahay da'daada marka aad geeriyooto. Inta ay da'daadu yar tahay, sanado yar ayad u baahan tahay in aad shaqeyso. Laakiin ma jiro qof u baahan in aad shaqeyso wax ka badan 10 sano si uu xaq ugu yeesho Lambarka Bulshada.

**Sida uu dhigayo sharciga gaarka ah**, haddii aad shaqeysay sanad iyo bar sadexdii sano ee ka horeysay intii aadan geeriyoon, macaashka waxaa la siinaya caruurtaada iyo xaaska/sayga korinaya caruurtaada.

## Yaa qaadan kara macaashka dhaxalka ee ku saleysan shaqada?

- **Ninka ama haweenta laga geeriyoodo** waxa ay qaadan karaan macaash buuxa marka ay gaaraan hawlgabka buuxa. Da'da hawlgabka buuxa waa ay kordheysaa si tartiib tartiib ah sanad kasta ilaa gaarto 66 dadka dhashay 1945 ilaa 1956kii. Da'da hawlgabka buuxa waa ay kordheysaa si tartiib tartiib ah sanad kasta ilaa gaarto 67 dadka dhashay 1962kii ama ka dib. Macaashka oo la yareeyey ayuu qaadan karaa ninka ama haweenta laga geeriyooday marka ay da'diisu tahay 60 sano. Haddii xaaska/sayga laga geeriyooday naafo yahay, macaashka waxa uu u bilaaban karaa 50 sano. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaaska/seyga laga geeriyoodo iyo dadka kale ee leh dhaxalka, soo booqo ***www.socialsecurity.gov/survivorplan***.
- **Haweenta ama Sayga laga geeriyooday** waxay qaadan kartaa macaashka da'a kasta oo ay tahay hadiiba ay xanaaneyneyso imahaaga da'diidu ka yar tahay 16 sano ama naafo ah, qaadanaya macaashka Lambarka Bulshada.
- Caruurta aad dhashay oo aan weli guursan oo ka yar 18 sano (ama ka weyn 19 haddii ay dhiganayaan dhiganayaan xilli buuxa ee dusgiga dhexe ama dugsiga sare). Caruurtaadu waxaya y qaadan karaan macaashka da'a kasta haddii ay naafo noqdeen inta aanay da'doodu gaarin 22 oo welina ay naafo yihiin. xaalado gaar ah qaarkood, macaashka waxaa la siinayaa ilmaha xaaskaagu dhashay, aad awoowaha u tahay, **ilmaha xaasku dhashay ay dhaleen, ama ilmo aad korsata**y.

***FIIRO GAAR AH:*** *Caruurta naafada ah oo dakhliga waaalidkood kooban yahay ama aan laheyn meel kale oo wax ka soo galaan waxa ay xaq u yeelan karaan Macaashka Kabitanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heleysaa daabacadda,* Benefits for Children With Disabilities *(Publication No. 05-10026-SO).*

- **Waalidka kula nool** waa ay qaadan karaan macaashka haddii ay da'doodu tahay 62 ama ka weyn. (Si waalidkaa ay xaq ugu yeeshaan macaashka, waa in taageerada ay helaan ay kala bar xagaaga ka timaado.)

## Macaashka xaaska/sayga kala tagay

Haddii aad kala tagteen, xaaskaagii ama seygaagii hore oo da'diisu gaartay 60 ama ka weyn (50-59 haddii ay naafo tahay) waa ay heli kareen macaashka haddii aad wada joogteen ugu yaraan 10 sano. Xaaskaagii/seygaagii hore, hase yeeshee, muhim ma aha in ay ka soo baxaan shuruurdaha da'da ama mudada aad wada joogteen haddii uu korinayo ilmo da'diisu ka yar tahay 16 ama naafo ah oo isna xaq u yeeshay naafada taasoo ku saleysan shaqada. Ilmahaasi waa inuu noqdaa xaakaagii/seygaagii hore ilmo uu dhab ahaan u dhalay ama sharci ahaan uu korsaday.

Macaashka lagu siiyo adiga oo ah qofka leh dhaxalka seyga/xaaska geeriyooday oo ka soo baxa shuruudaha da'da ama naafnimada ee qofka laga geeriyooday saameyn kuma yeelaneyso heerka macaashka la siiyo dadka

kale ee dhaxalka leh ee qaadanaya macaashka kuna qoran diiwaanka qofka soo shaqeeyey. Hase yeeshee, haddii aad tahay qofka leh dhaxalka aabe ama hooyo geeriyootay oo korinaya ilmo uu dhalay qofkii shaqeynayey da'diisuna ka yar tahay 16 ama naafoi ah, macaashkaaga waxa uu ku yeelanayaa saameyn dadka kale ee qaadanaya macaashka ee ku qoran diiwanka.

## Lacgta geerida ee hal mar kaliya la bixiyo

Waxaa jirta lacag hal mar la bixiyo oo ah $255 taasoo la siiyo marka qofku geeriyoodi haddii aad shaqeyneysay muddo kugu filan. Lacagtaas waxaa la siiyaa qoyskaaga ama ilmo aa qaan gaarin haddii ay shuruurdha qaar ka soo baxaan. Dadka leh dhaxalka way codsan karaan in la siiyo muddo laba sano gudahood ah geerida ka dib.

## Waa imisa macaashka

Inta uu qoyskaagu ka heli karo Lambarka Bulshada waxa ay ku xiran tahay lacagtii aad shaqeysay mudadii aad shaqeyneysa. Taas waxaa loola jeedaa haddii aad lacag badan shaqeysay, macashkaagu wuu wanaagsanaanayaa.

Akhri Warbixinta Lambarkaaga Bulshada si aad u ogaato qiyasta la siinayo dadka leh dhaxalka. Waxaa kale oo ay ku tusaysaa macaashka hawlgabkaaga iyo naafnimada, iyada oo laga helki karo macluumaad dheeraad ah. Saeyso xisaabta *my* Social Security ee barta internetka si aad u aragto Warbixintaada.

## Barta internetka *my* Social Security

Waxa aad si fudud uga sameysan kartaa barta internetka oo amaan ah *Warbixinta* Lambarka Bulshada . Waxa aaad ka heleysaa *Warbixinta Lambarkaaga Bulshada* si aad u ogaato dakhliga kuu diiwaan gashan iyo qiyaasta macaashka aad heleyso. Waxa kale oo aad isticmaali kartaa barta internetka *warbixinteyda* Lambarka Bulshada si aad u codsato kaarka laguugu bedelo kaarkaaga Lambarka Bulshada (laga heli karo gobolada qaarkood iyo Degmada Columbia). Haddii iminka macaash qaadato:

- Waxaa aad ka heli kartaa warqadda xaqiijinta macaasha;
- Aad bedesho cinwaankaaga iyo tgelefoon lambarkaaga, ama
- Waxa aad ka codsan kartaa kaarka dheeraad ah ee Medicare; iyo
- Codsi kaararka bedelka ah ee SSA-1099 ama SSA-1042S ee xiliga casnhuurta; ama
- Aad bedesho lacagta tooska loogu shubo bankiga.

Waxa aad furan kartaa xisaabta *my* Social Security haddii aad tahay 18 jir ama ka weyn tahay, aad leedahay lambarka bulshada, cinwaan rasmi ah oo mareykanka ah iyo iimeyl. Si aad u furato soo booqo ***www.socialsecurity.gov/myaccount***. Waxaa lagu weydiin doonaa macluumaadkaaaga sahaqsiga ah si laguu aqoonsado ka dibna waxa aad la baxeysaa magac xaraf sir ahna waad sameysaneysaa. Waxaa lagaa doonayaa inaad doorato sida laguugu soo dirayo eray sir ah oo mar kaliya laguu soo dirayo—in laguugu soo diro fariinta telefoonka ama iimeylka aad qoratay—oo lagaa doonayo in aad geliso si aad xisaab u furato. Marka oo aad ku gasho magaaca iyo xarafka sirta ah, waxaa telefoonka ama iimeyl laguu soo dirayaa eray sir ah oo aad mar kaliya ku gasho. Erayga sirta ah ee laguu soo dirayo waa mid aan ugu talo galeyno amaanka keydinta macluumaadka si aan u ilaalino keydinta macluumaadkaaga. Waa in aad xaasuusnaataa in shirkadaha telefoonku fariintaaad dirtoiyo tan laguu soo diro lacag lagaa qaadi karo.

## Marka qof qaraabo ah geeriyoodo … waxyaabaha aad dooneyso in aad ka ogaato macaashka dadka leh dhaxalka

### Sidee ayaan u codsadaa macaashka

#### *Haddii aad iminka qaadaneyn macashka Lambarka Bulshada*

Waa in aad codsataa macaashka dadka leh dhaxalka waaayo, xaaladaha qaarkood, macaashka waxaa la bixinayaa waqtiga aad codsataan ee ma aha marka uu qofku geeriyoodo.

Waxa aad ku codsan kartaa telefoonka ama Xafiiska Lambarka Bulshada ayaad tagi kartaa. Waxa aan kaaga baahaneynaa macluumaadka qaarkiis, laakiin dib ha u dhigin aad codsato haddii aadan maclumaadka oo dhan wada heyn. Waanu kaa caawineynaa sidii aad ku heli laheyd. Waxa aan u baahaneynaa dokumeentiga asalka ah ama sawirka ay soo shaabadeeyaan hay'addii soo saartay.

Macluumaadka waxaa ka mid ah:

- Caddeynta dhimashada—laga keeno goobaha dadka lagu aaso ama shahaadada dhimashada;
- Lambarkaaga Bulshada, iyo tan qofka geeriyooday;
- Shaahadaada dhalashada;
- Shahaadada guurka, haddii aad tahay xaas ama say laga geeriyooday.
- Warqadaha furiinka, haddii aad ku codsaneyso i xaas ama sey aad kala tagteen;
- Lambarka Bulshada ee caruurta kula nool, haddii ay suurtogal tahay, haddii la heli akro, iyo shaahadada dhalashada.
- foomka W-2 ee qofka geriyooday ama casnhuurta loo xareeyey ee ugu dambeysay haddii uu ahaa qof iskiis u shaqeysta; iyo
- Magaca bangiyada, lambarka xisaabta iyo lambarka ee bangiga (routing number), si macashka si toos ah loogu shubo xisaabtaada bankiga

#### *Haddii aad iminka qaadaneyso macashka Lambarka Bulshada*

Haddii aad lacag ku qaadaneyso adiga oo xaas ama say ah kuna saleysan shaqadii xaaska/saygaaga, waxaanu macaashkaaga u bedeleynaa macaashka dhaxalka. Haddii aynu u baahano macluumaad dheeraad ah, waan kula soo xiriiryenaa.

Haddii aad qaadaneyso macaash ku saleysan shaqadii aad soo shaqeysay, fadlan soo wac or soo booq. Waxaanu fiirineynaa haddii aad lacag dheeraad ah ku heli karto xaas ama sy laga geeriyooday. haddii ay sidaas noqoto, waxaad heleysaa macaash Ika isu geeyey oo la mid ah hadba kan badan. Waa in aad buuxisaa codsi si macaashkaaga loogu bedelo kan dhaxalka. Waxaa kale oo aan dooneynaa in aan arko shahaadada dhimashada ee xaaskaaga/saygaaga.

### Imisa ayaa la i siinayaa?

Macaashka lagu siinayo waa mid ku saleysan lacagta uu shaqeeyey qofka geeriyooday. Haddii uu lacag badan ku bixiyey Lambarka Bulshada, macaashku waxa uu noqnayaa mid badan.

Lambarka bulshada waxa ay isticmaalaan macaashka aasaaska ah ee qofka geeriyooday iyaga oo xisaaba imisa ayaa boqlkiiba uu of leg dhaxalka xaq u leeyahay. Tirada boqolkiiba wax ay ku xiran tahay da'da qoka leh dhaxalka iyo xiriirka kala dhaxeeyey qofka geeriyooday. Haddii qofka geeriyooday uu qaadanayey macaashka hoos loo dhigay, macaashka dhaxalka ee aad heleysaa waa mid kaas ku saleysan. Noocyada inta badan lacagta la bixiyo loo kala saaro:

- xaas ama say laga geeriyooday, ee da'da buuxda ee hawlgabka ama ka weyn, waxa uu inta badan la siinayaa 100 boqol macaashka aasaaska ee ah qofka geeriyooday.

- Xaas ama say laga geeriyooday, 60 jir ah ama ka weyn, laakiin aan gaarin da'da hawlgabka buuxa, waxaa la siinayaa 71-99 boqolkiiba macaashka asaaska ah qofkii geeriyooday, ama
- Xaas ama say laga geeriyooday, da'da kastaba ah ahaado, oo korinaya ilmo 16 jir ah waxaa la siinayaa 75 boqlkiiba macaashka asaaska ah qofkii geeriyooday.
- caruurtu waxa ay helayaan 75 boqlkiiba ee lacagta macaashka ee qofka geeriyooday.

### Macaashka ugu badan ee qoyska

Xad u go'an ma jiro macaashka la siiyo qofka iyo xubnaha qoyska bil kasta. Xadku wuu kala duwan yahay, laakiin inta badan waxa uu u dhaxeeyaa 150 ilaa 180 boqolkiiba ee qofka geeriyooday.

### Macaashka kale ee shaqada ee aan aheyn kan Lambarka Bulshada

Haddii aad qaadato macaash lagaas iiyo shaqada oo aad bixiso canshuurta Lambarka Bulshada, macashkaasi saameyn kuma yeelanayo macaashka Lambarka Bulshada. Hase yeeshee, haddii aad shaqada ka hesho macaash laakiin aan ku tirsaneyn macaashka Lambarka Bulshada — tusaale ahaan, shaqaalaha madaniga ah ee dawladda dehxe, shaqaalaha dawladda ee gobolada ama degaanka ama shaqada wadamada dibadda — waxaa suurtogal ah in hoos loo yareeyo macaashka Lambarka Bulshada.

Macluumaad dheeraad ah akhri, *Government Pension Offset* (Publication No. 05-10007), ee shaqaalaha dawladda ee laga yaabo in ay xaq u yeeshaan lacagta Lambarka Bulshada ee dakhliga xaaska/sayga. Akhri *Windfall Elimination Provision* (Publication No. 05-10045) oo loogu talo galay dadka ka shaqeeya wadamada kale, ama shaqaalaha dawladda ee xaqaq u leh lacagta la siiyo Lambarka Bulshada ee hawlgabkooda.

### Maxaa dhacaya haddii aan shaqeeyo?

Haddii aad shaqeyso adiga oo lagu siiyo macaashka dadka leh dhaxalka oo aad ka yar tahay da'da hawlgabka buuxa, waxaa laga yaabaa in la yareeyo macaashka haddii aad dhaafto xadka loogu talo galay. Da'da hawlgabka buuxa waa ay kordheysaa si tartiib tartiib ah sanad kasta ilaa gaarto 66 dadka dhashay 1945 ilaa 1956kii. Da'da hawlgabka buuxa waa ay kordheysaa si tartiib tartiib ah sanad kasta ilaa gaarto 67 dadka dhashay 1962kii ama ka dib. Si aad u ogaato inta uu nqonayo xadka dakhligaaga ee sanadka iyo sida marka dakhligaagu dhaafo ay u yareyneyso macaashka aad ka hesho Lambarkaaga Bulshada, oo weydii *How Work Affects Your Benefits* (Publication No. 05-10069-SO).

Ma jiro xad u go'an dakhliga ku soo gala marka laga bilaabo bisha ugu horeysa ee hawlgabka buuxa.

Sidoo kale, dakhliga ku soo gala waxa uu yareynayaa **oo kaliya** macaashka lagu siiyo, ee ma yareynayo macaashka la siiyo xubnaha kale ee qoyska.

### Maxaa dhacaya haddii aan dib u guursado?

Guud ahaan, laguma siinayo macaashka xaaska ama sayga laga geeriyooday haddii aad dib u guursato inta aanay da'daadu gaarin 60. Laakiin haddii aad dib u guursato marka ay da'daadu 60 sano gaarto ka dib (ama 50 haddii aad naafo tahay) kaama hor istaageyso in lagu siiyo macaash ku saleysan shaqada xaaska ama saygii **hore**. Iyadoo da'da 62 iyo wixii ka sareeya, waxaa suurto gal ah in lagu siiyo macaash ku saleysan shaqada xaaska ama sayga uu horey u shaqeeeyey, haddii uu macaashkaasi ka badan yahay.

### Xaqa aad u leedahay Racfaanka

Haddii aad nagu diidam tahay go'aank aan ka gaarno codsigaaga, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan. Faahfaahin ku saabsan talaabooyinka aad qaadi karto, akhri *The Appeals Process* (Publication No. 05-10041-SO).

Waad diyaarinracfaankaaga inaga oo lacag la'aan kugu caawineyna ama waxa aad sameysan kartaa wakiil ku caawiya. Waxaanu ku siineynaa macluuamadka hay'adaha aad ka heli karto caawinaad si ayw akiil kaaga noqdaaan. Faahfaahin ku saabsan talaabooyinka aad qaadi karto, akhriMacluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wakiilka, akhri *Your Right to Representation* (Publication No. 05-10075-SO).

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan 80, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

### Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.

Securing today and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10084-SO | March 2018
Macaashka dhaxalka
Survivors Benefits (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha